



U soo Sheegida Bedelida Ciwaanka Maxkamadda Laanta Socdaalka (immigration)

Reporting a Change of Address to the Immigration Court

Ma khasab inaan u sheego maxkamadda laanta socdaalka kolka aan bedelo ciwaankayga?

Haddii aadan ahayn muwaadin Mareykan ah (U.S.), ayna kaaga furan tahay dacwo wadanka ka saarid ah maxkamadda laanta socdaalka, waa inaad u sheegto Xafiiska Sare ee Dib u Eegida dawooyinka wadan ka saarida ah [Executive Office for Immigration Review (EOIR)] meesha aad ku nooshahay. Waa khasab inaad ugu sheegto 5 cisho oo maalmaha shaqada ah gudahood mar walba oo aad guurto ama aad bedesho ciwaankaaga. Sidoo kale waa inaad u sheegto ciwaan bedelidaadda haddii aad hesho foom ay ku qoran tahay akhbaar la soo xiriirid ah oo aan sax ahayn. Tusaale ahaan: haddii aad hesho foom Ogaysiis Imaansho maxkamadda ah laakiin ciwaankaaga ku qorani uu khalad yahay.

U sheeg ciwaan bedelida adigoo isticmaalaya Foomka **EOIR-33**.

Maxkamadda laanta socdaalku **kaliya** waxa ay ku sameysaa bedelidyo akhbaartaada la soo xiriirida iyadoo adeegsanaysa akhbaarta ku qoran diwaanadda EOIR's kolka aad dirto foomkan. Ma ay bedeli akhbaartaada la soo xiriirida iyadoo ku salaysan akhbaar kale ama wada hadal lala yeesho maxkamadda.



Waxa aad u baahan tahay inaad u buuxiso nuqul gooni ah oo foomkan ah qof walba oo kiis uga furan yahay maxkamadda laanta socdaalka oo uu ciwaankiisu isbedelay.

Haddii aadan ahayn muwaadin Mareykan ah (U.S.) laakiin kiis furan aadan ku lahayn maxkamadda laanta socdaalka, waxaad sidoo kale u baahan tahay inaad soo sheegto isbedelka ciwaanka. Laakiin waxa aad u baahan tahay inaad u soo sheegto hay'adda Muwaadinimadda Mareylkanka (U.S. Citizenship) iyo Adeegyadda Laanta Socdaalka [Immigration Services (USCIS)] ee aadan u sheegin maxkamadda. Arrintan waxaa loo sameeyaa si ka duwan tii hore. Eeg warqadayada xogta aruursan ee [U soo Sheegida Ciwaan Bedelida USCIS](#).

Sidda loogu soo sheego ciwaan bedelidda maxkamada laanta socdaalka?

Waxaa jira dhowr siyaabood oo looga bedeli karo ciwaankaaga maxkamadda laanta socdaalka. Dhamaan kuligood waxa ay isticmaalaan foomka EOIR-33. Waxa aad ka bedeli kartaa ciwaanka **khadka (online)**, **boostadda** ayaad soo dhigi kartaa foomka, ama foomka waxa aad gacanta ugu geyn kartaa maxkamadda.

Haddii xaakim maxkamadda laanta socdaalka ahi uu ku jiro kiiskaaga isticmaal EOIR-33/IC si aad uga cusboonaysiiso maxkamadda.

Haddii aad racfaan ka qaadanayso kiiskaaga laanta socdaalka, u dir Form EOIR-33/BIA Golaha Racfaanadda ee Laanta Socdaalka (Board of Immigration Appeals). Waxa aad ka heli kartaa EOIR-33/BIA mareegta (link) foomka ee hoose. Tilmaamaha warqadan xogta aruursan ah waxaa loogu talagalay u dirida Foomka EOIR-33/IC maxkamadda laanta socdaalka.

Arrin Muhiimka ah: Mar walba oo aad ka bedesho ciwaankaaga maxkamadda laanta socdaalka, waa khasab inaad siddoo kale aad ogysiiso taa qareemadda Wasaaradda Amaanka Qaranka [Department of Homeland Security (DHS)]. Eeg qaybta hoose ee ornaysa “Sidda loo ogaysiiyo Hay’adda DHS Ciwaan Bedelidaadda.”

Dukumiintiyadda ama Akhbaarta Aad u Baahan Tahay si aad u Buuxisio Foomka EOIR-33

- 1 - Ciwaankii, telefankii ama Ciwaanka Emaylkii ee hore
- 2 - Ciwaanka, telefanka iyo Ciwaanka Emylka ee cusub
- 3 - Lambarka Ajnabiga (Alien Number) – waxa uu ku kor qoran yahay dhamaan dukumiintiyadaada laanta socdaalka. Waa xarafka A oo ay ku xigaan tirooyinka 7-9.
- 4 - Goobta Maxkamadaadda Laanta Socdaalka (Immigration) (U badan inay tahay Fort-Snelling)



Ku Bedelida Ciwaankaaga Khadka (online)

Si aad uga xareyso khadka gal barta

<https://respondentaccess.eoir.justice.gov/en/forms> ka dibna ka dooro afkaaga geeska kore ee midig. Dooro foomka adiga ku quseeya: Foomka EOIR-33/IC ee maxkamadda laanta socdaalka ama foomka EOIR-33/BIA ee racfaanadda. Buuxi akhbaarta ku jirta shaashad walba. Ka dib kolka aad dhamayso, ku dhufo dir (submit) waxa aynka kolkaa ka dib toos u aadi iyadoo kumbuyuuytar wado maxkamadda laanta socdaalka. Uma baahid akoon inaad furato si aad tan uga buuxiso khadka (online) ka. Waxaad kaloo isticmaali kartaa mareegta (link) hoose si aad uga buuxiso foomka khadka (online) 3 af.

English: [Change of Address Form \(EOIR-33/IC\)](#)


Spanish: [Formulario de cambio de domicilio \(EOIR-33/IC\)](#)

Haitian-Creole: [Fòmilè Chanjman Adrès \(EOIR-33/IC\)](#)

Ku Bedelida Ciwaankaaga Boostada Warqad aad soo dhigayso

Haddii aad doonayso inaad foomka boostadda u soo dhigto Maxkamadda Laanta Socdaalka, waa aad sameyn kartaa:

- Daabaco ka dibna gacanta ku buuxi, ama
- ku buuxi kumbuyuutarka ka diba daabaco



Nuqulo (copy) ka sameyso foomka si aad ugu dirto qareemadda hay'ada DHS ka.

Afafka Ingiriiska iyo Isbaanishku waxa ay leeyihiin qaab (PDF) ah oo la daabsan karo si loo buuxiyo. Gal Barta <https://www.justice.gov/eoir/eoir-forms>. Riix falaarta hoos u jeeda ee dhinac taal EOIR 33/1C- Ciwaan Bedelida/Foomka La soo Xiriirida ee Maxkamadda Laanta Socdaalka. Waxaad kaloo isticmaali kartaa mareegaha (links) hoose. Daabac mid labo-dhinac leh haddii aad awoodo, waayo waxa ay leedahay ciwaanka maxkamadda oo jaa horey loogu dul daabacay. Haddi aadan daabici karin mid labo-dhinacle ah, daabac 2 da bogba ka dibna hubi inay si fican isugu liqaadan yihiin kolka aad isku laabo ee boostadda dhigayo.

Kolka la buuxiyo lana daabaco, iskaga laab bogga laynka xariijimaha jiitanka leh ee leh “Halkan Isaga Laab “Fold Here.” Hubi inaad arki karto qaybta ciwaanka ka dib kolka aad bogga isku laabto. Ka dib kolka aad isku laabto, isku lifaaqdo, ama aad ka sharootayso foomka la isku laabay hareeraha meesha furan ee lagu calaamadiyey Halkan ka Dhuuji “Fasten Here.” Farangaboolo ku dhaji meesha lagu calaamadiyey “Halkan ku Dhaji Farangabooladda.” Ku qor ciwaankaaga cusub meesha lagu calaamadiyey “KU QOR CIWAANKAAGA HALKAN” ka dibna boostadda ugu dir foomka Maxkamadda.

Waxaad ku ridi kartaa boqshad ka dibna waxa aad ku dul qori kartaa ciwaanka boqshadda.

Foomamka boostadda lagu soo diri waa afafka Ingiriiska iyo Isbaanishka kaliya.

English EOIR-33: [Change of Address/Contact Information Form](#)

Spanish EOIR-33: [Formulario para Cambio de Dirección/Información de Contacto](#)

Bedelida Ciwaankaaga adigoo Xaadir ah

Haddii aad u baahan tahay inaad degdeg u cusboonaysiiso ciwaankaaga, la tag foomkaaga buuxsan Maxkamadda Laanta Socdaalka ee Fort Snelling. Gacanta uga dhiib foomka dadka joogta miiska daaqada Maxkamadda Laanta Socdaalka.

Ciwaanka Maxkamadda Laanta Socdaalka:

Fort Snelling Immigration Court
Bishop Henry Whipple Federal Building
1 Federal Drive, Suite 1850
Fort Snelling, MN 55111

**Sidda lagu ogaysiiyo hay'adda DHS ciwaan bedelidaadda**

Waxa aad u baahan tahay inaad ka siiso hay'adda DHS nuqul (copy) Foomka EOIR-33 adigoo gacanta uga gaynayo ama ku siinaya khadka (online) ka ama boostadda u dhigaya. Khasab ma aha inaad u sameyso isla sidii aad maxkamadda uga samaysay. Tusaale ahaan, waxa aad ka sameyn kartaa ciwaan bedelida maxkamadda khadka (online) ka dibna waxa aad boostadda u dhigi kartaa nuqul hay'adda DHS.

Khadka (Online): Uga dir nuqul Foomka EOIR-33 adigoo adeegsanaya ilinka khadka (online) ka ee DHS eService. Marka hore, waa khasab inaad iska diiwaangeliso aadna akoon ka sameysato barta <https://eserviceregistration.ice.gov>. Ka dibna aad raacdo talaabooyinka si aad ugu dirto foomka ciwaan bedelida.

Boostadda dhigida ama gacan ka geynta:

Waxaad kaloo ku diri kartaa nuqul ah foomka EOIR-33 (Form EOIR-33) boostadda adigoo ku hagaajinaya ciwaanka hoose. Hubi inaad foomka ku rido boqshad aad ku dul qorto ciwaanka qareemadda hay'adda DHS. Ha u wada dirin 2 nuqul oo foomka ah Maxkamadda Laanta Socdaalka.

Ciwaanka Qareenadda Hay'adda DHS:

Office of the Principal Legal Advisor, Minneapolis-St. Paul
1 Federal Drive, Suite 1800
Fort Snelling, MN 55111

Haddii aad rabto inaad foomka gacanta ugu gayso, xafiiska qareenadda hay'adda DHS waxa uu ku yaalaa isla dhismaha ay maxkamadda laanta socdaalku ku taal. Tag ciwaanka kor ku xusan ka dibna geli nuqul ah Foomka EOIR-33 santuukha boostadda ee OPLA (Office of the Principal Legal Advisor). Waxaa loo geyn foomka qareenadda hay'adda DHS ka.

Ka waran haddii aanan sheegin ciwaan bedelida?

Haddii aad leedahay kiis maxkamadeed oo ka furan laanta socdaalka, sharci ahaan waa inaad soo dirtaa foomka EOIR-33 si aad u cusboonaysiiso ciwaankaaga 5 cisho gudahood kolka aad guurto.

Hadii ogaysiis ah inaad hor timaado xaakim laanta socdaalka (immigration) ah laguugu soo diro ciwaankaaga aadna tagin makamadda, hay'adda DHS waa ay ku soo xiri kartaa ama waa ay ku hayn kartaa.

Siddoo kale, waxa aad gafi kartaa ogaysiisyo muhiiim ah oo ku saabsan dhagaysiga kiiskaaga haddii aysan haynin maxkamaddu ciwaankaaga cusub. Maxkamadda Laanta Socdaalku waa ay qaban kartaa dacwo dhagaysiga kiiskaaga ah la'aantaada waxa ayna amri kartaa in wadanka lagaa saaro. Haddii la amro in wadanka lagaa saaro waayo waxa aadan tagin dacwo dhagaysigaagii cawaaqibyaddan soo socda ayaa dhici kara:

- wixii codsi ah ee aad soo gudbisay waa la baajin karaa
- waxaa dhici karta inaad helin manfacyadda qaarkood mustaqbalka.
- Waxaa laguugu amri karaa inaad joogto dibadda wadanka Mareykanka (U.S.) 5 sanno ama 10 sanno (tani waxa ay ku xiran tahay nooca kiiska masaafurinta ah ee aad leedahay)



Xog Urursan oo ku saabsan macluumaadka sharciga MA AHA talo xagga sharciga. La tasho qareen. Ha isticmaalaan xogtan urursan haddii ay 1 sano ka soo wareegtay xilligii la daabacay. Weydiiso xogtii ugu dambeysay, liiska xogta urursan, ama aad ku hesho habab kale.

© 2026 Minnesota Legal Services Coalition. Qoraalkan waa la sii badin karaa waxaana loo adeegsan karaa oo kaliya hab shaqsi ah iyo waxbarasho kaliya. Xuquuqda kale waa mid la dhawray. Ogeysiiskan waa inuu la socdaa nuqul kasta oo la sii daabaco. Dib u daabicidda, sii qeybinta, iyo in loo isticmaalo hab ganacsi ah waa mid si adag loo mamnuucay.